

Bayaanka Saameynta Sinnaanta ee Bandhiga Guddiga Dugsiga ee Xeelada Qorshaha warbixinta Sannadlaha SY20-21

Cinwa
ank: Hirgelinta Qorshaha Xeelada ee Warbixinta Sannadlaha ah
Taariikh
da: Oktoobar 27, 2021

Wuxuu ahaa [Agabka Qorshaynta Sinnaanta](#) isticmaalay? Haa Maya

Haddii haa tahay, geli taariikhda kulamada REPT oo ku xir halka REPT oo dhammaystiran: 2/7/20 [Xeelada Qorshaha REPT](#)

Miyuu xubin ka ahaa Qeybta Sinnaanta, Xeelada iyo Nusqaamaha Fursad dib-u-eegay bayaankan? Haa Maya

Qaybaha Agabka Qorshaynta Sinnaanta Isirka BPS	Soo koobida/Caqli galka
1. Soojeedin/Bandhig & Saameyn <i>Maxay yihiin soojeedinta/dadaalka natiijooyinka la rabay, oo ay ka mid tahay ciribtirka kala duwanaanshaha? Ayaa hogaamiyay shaqadan /qorshaynta, oo ma waxay ka tarjumayaan ardayda BPS iyo qoysaska aqoonsiga kooxda (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyadka Madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, soogalooti, luqado badan, oo leh khibrad Waxbarasho Gaar ah)?</i>	<p>Qorshaha Xeeladeed ee BPS waa la qaatay oo la ansixiyay Abriil 29-keedii, 2020. Sannad dugsiyeedka 2020-2021 wuxuu ahaa sannadkii ugu horreeyay ee hirgelintiisa. Bandhigani waxa uu bixin doonaa cusboonaysiinta fulinta oo qeexi doonta horumarka aanu ka samaynay lixda ballanqaad ee Qorshaha Xeelada.</p> <p>Xaalada Qorsha ujeedadeedu waxay tahay in la hubiyo in "cunnug kasta oo ku jira fasal kasta oo dugsi kastaa uu helo waxay u baahan yihiin." Hirgelinta waxaa hogaaminaya kormeeraha guud, Kooxda Fulinta, iyo madaxda waaxyaha; Hogaamiyayaashani waxay xoogaa wakiil ka yihiin ardayda iyo qoysaska BPS, waxaana ku jira shaqsiyaad khibrad u leh bartayaasha Ingiriisiga iyo Waxbarashada Gaarka ah. Bandhiga waxa ku jiri doona dib u eegis kooban oo ku saabsan habka qorshaynta ilaa maanta iyo dulmar talaabooyinka xiga.</p>
2. La jaanqaadida Qorshaha Xeeladeed <i>Siddee soojeedinta/ dadaalka la jaanqaaday qorshaha xeeladeed ee degmada?</i>	<p>Bandhigu waa warbixinta sanadlaha ah ee hirgelinta Qorshaha Xeeladeed. Qorshuhu wuxuu la jaan qaadayaa Fursadaha iyo Nidaamka Gaarida Nusqaanka 2016.</p>
3. Falanqaynta Xogta <i>Waa maxay xogta la falanqeeyay? Ma waxaa lagu kala saaray jinsi iyo kooxo kale oo muhiim ah? Maxay muujisay marka loo eego kala duwanaanshaha?</i>	<p>Xogta dib loo eegay waxaa ka mid ahaa qiimaynta gobolka iyo natiijooyinka isla xisaabtanka (la kala saaray), iyo xogta tayada leh ee ka qaybgalka daneeyayaasha (aan la kala saarin). Natiijooyinka gobolka ayaa muujinaya farqi weyn, oo ku salaysan jinsiyadda, baahiyaha gaarka ah, iyo heerka bartayaasha Ingiriisiga.</p>
4. Kaqeybgalka Daneeyayaasha <i>Yaa ku hawlanaa (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sidee, maxaase ka dhashay taasi? Maxay ardayda / qoysasku saamaynta ugu badan ku yeeshen soo jeedintan / dadaalkaan sheegteen?</i>	<p>Ka-qaybgalka socda: Iyada oo hogaaminaysa soo saarista bisha Janaayo ee Warbixinta Sannadlaha ah, kooxaha daneeyayaasha gudaha iyo dibadda ayaa la isugu yeeri doonaa wadahadal ku saabsan horumarka qorshaha isticraatiijiyadeed si loogu sheego fulinta qorshaha socda.</p> <p>Ka-qaybgalka Asalka: In ka badan 102 shirar daneeyayaal ah iyo kulamo kale oo waalidka; magaalada oo dhan, xaafad ku salaysan, iyo dhaqan ahaan iyo kulamo bulsho ku salaysan luqad ahaan; golyayaasha</p>

	<p>bulshada ee ay wadaan dhalinta, dib u gurashada gudida dugsiga; iyo booqashooyinka kormeeraha guud ee dhammaan dugsiyada BPS. Wadajir U Qaatay, in ka badan 2,000 oo cod ayaa la maqlay, inkastoo xogta tirakoobka aan si joogta ah loo ururin.</p> <p>Mawduucyada muhiimka ah ee ka soo baxay waxaa ka mid ah: Dhismayaasha dugsiyada oo la casriyeeyay oo leh goobo jimicsi, maktabado, maqaaxiyo, xarumo faneed, iyo kuleyl si wanaagsan loo dayactiray, hawo-siin, iyo hababka qaboojinta</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maalgelin xaq ah oo loo siman yahay dhammaan dugsiyada ● Wadooyin cad oo la saadaalin karo laga bilaabo dugsiga barbaarinta ilaa qalin-jabinta ● Gaadiid la isku halayn karo, la heli karo, oo wakhtiga loogu tala galay iyo hawlo waxtar leh ● Shaqaale daryeel iyo karti leh oo ka tarjumaya ardaydeena ● Adag iyo dhaqan iyo luqad ahaanba xaqiijinaya manaahij ardaydu udub dhexaad u tahay ● Barnaamijyada la hagaajiyay iyo fursadaha waxbarasho ee labo/luqadaha badan oo kordhay ee bartayaasha Ingiriisiga ● Barnaamijyo la wanaajiyey iyo fursado loo wada dhan yahay oo kordhay oo loogu talagalay ardayda leh baahida waxbarasho ee gaarka ah ● Hormarka xirfada shucuurta-bulsho, jaah-wareer tilmaamo la ogeeysiiyay, iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxda ● Barnaamijyo kala duwan oo ay ku jiraan farshaxanka, waxbarashada jirdhiska, ciyaaraha fudud, iyo umeerinta inta lagu jiro dugsiga iyo dibadiisa ● Helitaanka tignoolajiyada qarniga 21aad ee dhammaan ardayda
<p>5. Xeeladaha Sinnaanta Isirka <i>Sidee soo jeedintan / dadaalkani u yareysaa kala-duwanaanta iyo kordhinta isirka iyo sinnaanta kale? Maxay yihiin cawaaqibta aan la filayn? Maxay yihiin xeelado dhameystiran oo sii horumarin doona sinnaanta?</i></p>	<p>Xeelada Qorshaha iyo ballanqaadyadu waxay leeyihiin sinnaanta xaruntooda, laga bilaabo Ballanqaadka #1: baabi'inta fursadaha iyo daldaloolada guusha si loo gaaro natiijooyin arday oo siman oo heer sare ah. Mabda'a aasaasiga ah macnihiisu waa arday kasta - iyadoon loo eegin jinsiyadda, qowmiyadda, isirka, nooca galmada, diinta, heerka socdaalka, xaaladda dhaqaale, ama zip koodhka - waxay heli doonaan waxbarasho heer sare ah iyo fursadaha ay u baahan yihiin oo ay u qalmaan inay buuxiyaan awooddooda. Gaaritaanka aragtidan waxay nooga baahan tahay inaan wax ka qabanno farqiga muuqda ee la socda Fursadda iyo Nidaamka Gaarida Nusqaanka, gaar ahaan ku salaysan jinsiyadda, iyo ardaydeena kuwa barta Ingiriisiga iyo/ama qaba baahiyo gaar ah. Qorshaha sidoo kale waa la cusboonaysiiyay si loogu daro mudnaantii soo ifbaxday ee macnaha guud ee jawaabta ku wajahan sinnaanta ee degmada ee COVID-19.</p>
<p>6 Miisaaniyad & Hergelinta <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadda? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeedooyinka oo dhan, gaar ahaan ujeedooyinka sinnaanta la xiriira, in la fuliyo? Maxay yihiin aqoonsiyada koox ee</i></p>	<p>Miisaaniyadaha SY21 iyo SY22 waxay la socdeen qorshaha xeeladeed. Fulinta qorshaha waxaa hogaaminaya Kormeeraha Guud, Kooxda Fulinta, iyo Qaybta Sinaanta iyo Xeelada. Inta badan kooxdani waa Madow, Latinis, Aasiyaan iyo dhammaan waxa lagula xisaabtami doonaa in ay adeegsadaan lens sinaanta adag si loo hirgeliyo iyadoo la isticmaalayo muraayadda sinnaanta isirka.</p>

<p><i>kooxda fulintu, oo ma waxay keeni doonaan muraayad sinnaan ah?</i></p>	
<p>7. Isla-xisaabtan & Isgaarsiin <i>Sidee saamaynta loogu yeelan doonaa qiimeyn, diiwaangelin iyo la socodsiinta daneeyayaasha? Yaa masuul ka noqon doona?</i></p>	<p>Hirgelinta iyo saamaynta qorshaha xeeladeed ayaa si joogto ah loo diiwaan gelin doonaa oo si guud ayaa loo sheegi doonaa. Natiijooyinka ka soo baxa waxaa la qiimeyn doonaa iyadoo lagu salaynayo tallaabooyin cayiman oo qorshaha lagu soo daray. Kormeeraha guud, Kooxda Fulinta, Qaybta Sinaanta iyo Xeelada, iyo Guddiga Dugsiga ayaa mas'uul ka noqon doona qiimeyntan iyo isgaarsiinta socota. Bandhigyada saddex-biloodlaha ah ee guddiga dugsiga iyo warbixinta sannadlaha ah waxay u adeegtaa sida qiimeynta saameynta iyo habka isgaarsiinta ee daneeyayaasha.</p>